Warqad Furan III: Arligu Waa Dhaxalkeygee, Hayga Iibin Awoowe!

W.Q: Inj. Maxamed Cali Cibaar

Qoraalkani wuxuu ka tarjumaya dareenka danyarta iyo dulmanayaasha Soomaaliyeed ee maanta ku ildaran dalka Soomaaliya gudihiisa iyo dunida daafaheedaba. Qoraalku wuxuu si gaar ah uga warramayaa duruufaha ku xeeran carruurta agoomaha ah ee aan lahayn ehel u gargaara, nasiib-darrana ay ka sii jeedaan indhaha inta wax haysata. Qoraalku waxuu soo gudbinayaa farriin ku socota dadka isku boqray hoggaanka ummadda, ama "siyaasiyiinta" sida badanaaba loo yaqaanno, kuwaas oo in badan oo ka mid ahi ay howl ka dhigteen dibindaabyada dadka ay sheeganayaan in ay metelaan mas'uulkana ka yihiin.

Warqaddan furan oo ka timid agoonka magaciisa la yiraahdo Dulmane Daacad, wuxuu u dirayaa awowgiis Dagane Danmooge oo ka mid ah kuwa horboodaya oo wax ka maleegaya dabinnada lagu dibindaabyeynayo dadka Soomaaliyeed, waxayna warqaddu u qorantahay sidan:

Ka: Dulmane Daacad
Xaafadda:Danyar
Magaalada:Dayacan
Dalka: Soomaaliya

Ku: Awoowe Dagane Danmooge
Xaafadda: Loo Daran
Magaalada:Dulman
Dalka :Soomaaliya

Taariikh: 15-07-2006

Bismillaahi Raxmaani Raxiim,

Awoowe Dagane,

Salaan ka dib, waxaa mahad leh Rabbigii ii suurto geliyay inaan warqaddaan kuu soo diro annagoo aan muddo dheer kala warhelin. Waan la socdaa inaad mashquul aad ugu tahay howl adduun iyo siyaasadda ceynwareegtay ee Soomalida maanta, waxaanse rajeynayaa inaad heli doonto firaaqo yar oo aad warqaddaan ku aqriso ugu yaraan hal mar. Fadlan Awoowe arrintaas ku dadaal haba ku dhibo aqriskuye.

Awoowe Dagane,

Waxaan kuu hayay, walina kuu hayaa ixtiraam waalidnimo iyo qaddarin weyn. Laakiin nasiibdarro dhankaada iima haysid wax naxariis ah, mana fahamsani sababtaas! Waxaa ii muuqata in aadan kala jecleynba in aan caafimaad qabo iyo inuu cudur i hayo. In aan qaawanahay iyo in qeyd aan cowrada ku dado aan haysto. Awoowe, xaggeed igu ogayd nolol iyo geeri? Ma ka warhaysaa meesha ay ku

dambeyeen Aabbe Abshir (Daacad), hooyo Asli (Caato) iyo labadii walaalahey ahaa ee iga waaweynaa, walaalkey Axmad iyo walaasheey Ayaan ?

Awoowe Dagane,

Warqaddan kuuguma soo dirin in aan deeq iyo daryeel kugu weydiisto Daa'in baa deeq iyo dulqaadba lehe. Waxaan rabay oo kaliya in aniga oo matalaya inta danyarta ah ee ila dulman aan adiga iyo saaxibbadaada aad isku doonta saarantihiin idiin soo gudbiyo codsi ka tarjumaya guud ahaan dareenka dulmaneyaasha Soomaaliyeed, gaar ahaanna carruurta agoomaha ah ee aan ku wada hoyanno darbiyada dundunsan ee magaalada Dayacan.

Awoowe Dagane,

Waxaan kula socodsiinayaa in maanta aniga iyo malaayiin Soomaali ah oo ku dhibban dalka gudihiisa iyo dibaddiisuba dhaxalka kaliya ee aan gacanta ku haynaa uu yahay DHULKA SOOMAALIYEED oo waliba hadda kala dhantaalan. Awoowe, af-kala-qaad iyo amakaag ayay nagu noqotay markii aan maqalnay in adinkoo sheeganaya mas'uuliyiin ummaddeed muddo dheer oo aad hurineyseen colaado-sokeeye ka dib ay haddana idinla qummanaatay inaad dhuuni dhaafsataan dhulkeennii Rabbi dhaxalka noo siiyay ee qarniyo badan dhiigga loo soo huray sidii loo difaaci lahaa, cadowyada duullaanka ku ahna looga yureyn lahaa.

Awoowe Dagane,

Sidaad la socotaba qaarkiin waxay qaybo dhulkeenna ka mid ah ka kireeyeen shirkado iyo dowlado burcad ah oo dhulkaas si dadban loogu xalaaleeyay. Qaarkiin waxay dhulkeenna berrigiisa iyo baddiisaba ku duugeen sun halis ah oo aafadeeda leh, adduunyaduna iska soo fogeysay. Qaar ayaa dab qabadsiiyay dalag iyo duurba oo deegaankii ka soo reebay dogobyo dhuxul ah oo ay dalal shisheeye u dhoofiyaan. Qaar kalena waxeyba si aan gabbasho lahayn u go'aansadeen in ay ciidan cadow noo gacan-geliyaan iyagoo u xilanaya ceesh aan ka badnayn wax maalmo caloosha lagu cabbeeyo, ceebta Alle (SWT) ha asturee!

Waa yaabe awoowe, haddii aad dhulka naga xaraashtaan, annaga haba na xaaleynina, dadnimo kalena ha xeerinninee, adinka xaggee idiin degaan noqoneysa? Maxaad kula collowdeen dhulkiinna iyo dhashiinna? Maxay idiin dhimeen? Ma illowdeen in Alle iyo umaddiinnuba ay idinla xisaabtami doonaan, wixii aad geysateenna la idinka abaalmarin doono?

Awoowe Dagane,

Ugu dambeyntii, aad ayay ii xanuunjineysaa in aan kaaga sheekeeyo xaaladda aan hadda ku noolahay, meesha uu reerkeygii - Abbe, hooyo, walaalo- ay ku dambeeyeen, iyo hadda sida uu dareenkeygu yahay. Hase ahaatee anigoo soo koobaya ayaan isku dayayaa in aan dareenkeyga ku muujiyo geeraarkan hoose oo aan Alle(SWT) ka rajeynayo in shimbirka farriin-wadaha ahi uu kugu soo simo kuna soo gaarsiin doono isagoo badqaba.

Geeraarku wuxuu ku billaabmayaa:

Shimbirkeyga Abwaanow
Ugaaskii nabadeedoow
Afhayeenka kan liitow
Abbaanduullaha khayrkow
Arraxmaan ha ku daayoo
Kaama waayo agteydee
Anigoon ixtiraamka
Edabtii wax u sheeggiyo
Asluubtiiba hilmaamin
Awoowahayga habaabiyo
Odayadaan nasan waayee
Cadowgu uu ajaraayoo
Arrinkii ka xumaaday
Erey yar oon u faraayiyo
Akhbaartaan degdeggaa
Orod saaxiib u geeyoo
Akhrisku kuu ku cuslaado
U higgaadi farriinta
Ku adkee fahamkeeda
Ula jeedka dhacsii
Inkirmaadna ma fiicnee
Ikhwaanow digiddaada
Shacabku suu ogaado
Idilkoodba ha gaartee
Ogeysiiska ka sheegoo
Isgaarsiinta ku faafi :

“ Waa iska xaalad adduunyee
Agoon baan ahay maanta
Aabbihii Abshir Daacad
Aadaanki salaadda
Asagoo kallahaayoo
U ordaaya Masaajid
Oo istaaqfurulleysan
Ashadaadna qiraaya
Qaar isbaaro u taallo
Oo Ibleysku hagaayo
Oo alaalax sakhraansan
Akee ay ku fureenoo
Afartankii ku dhammaatay
Amintiina xijaabtay
Hooyadii Asli Caatana
Arbacadii kala haadka
Iyo maati xasuuqa
Iyadoo afar maalin
Aan afkeeda wax saarin
Ajasheedi dhamaatooy
Umul raacatay baahi
Alle how naxariisto.
* * * * * * * * * *



Axaddii Madfac tuurkiyo
Isniintii ka dambeysee
Boqollaalka la aasay
Arabbikhi aan badnayn iyo
Ukun reerka u taallay
Isagoo mid acuuduye
Inkaar qabaa naga booboon
Gaajo sii engegeynoo
Ciddu oon haqaneyso
Walaalkey Axmeddeey iyo
Inantii ka yareydba
Iyagoo biyo raadshay
Aroorkey u baxeen baa
Aragti iigu dambeysoo
Gantaalihii la afuufay
Iney unuunka jareenoo
Iilkii hoose la geeyoo
Ifka ay ka tageenba
Gadaal baan ka ogaaday
Alle how naxariisto.
* * * * * * * * * * * * * *

Ehelkey markaan waayay
Arxan waaban ka quustay
Aroortii ma quraacdo
Ayaan ayaan ma qadeeyo
Cashana waaban illoobay
Adkeysi baan jiscintaayoo
Ilmada aan ku tiraa
Waxa aanse ogsoonay
Hadduu Eebbe yiraahdo
Mar inaan istareexiyoo
Aaggoo noo nabadoobay
 Intifaacsan dhulkeygoo
Amaah looma baxshaaniyo
Arligu waa dhaxalkeygee
Aakhiraan la hureyne
Ilaahaaga ka yaaboo
Rabbi baa wax arsaaqee
Adigoo anfac raadin
Hayga iibin Awoowe!
* * * * * * * * * * *



Ubad baan ahay yaabban
Adduunkii ku dhibtooday
Abaar tii u darneyd iyo
Cudur oofaha gooyay
Saan u aallo bal eeg
Itaalkeyga bal fiiri
Axe ! meeyay damiirkii?
Aahe, waa ku sidee?
Aqligii ma dhammaaday?
Aawayeey Naxariistii?
Miyaadan aadmi ahayn?

Jirro markey i asiibto
Aasbiriin wax i siiya
Abidkey uma jeedin
Oofwareenkan la taahi
Oohdimaa igu taagan
Araggu weyga xumaaday
Ma awoodo ciyaaroo
Istaaggaan ka dhacaa
Qufac baan uxu leeyay
Xanuunka meel an la aadiyo
Isbitaal ma aqaanno
Uskag shey lala tuuriyo
Calal markaan arki waayo
Arradkaan huwadaayoo
Asturaadba ma haysto

Hadduuse Eebbe yiraahdo
Ixsaankii lagu diimiyo
Axaadiisti Rasuulka (SCW)
Mar baa aayadda diinta
Lagu oogi dastuurkoo
Aaran loo gudbayaaye
Amaah looma baxshaan iyo
Arligu waa dhaxalkeygee
Aakhiraan la hureyne
Ilaahaaga ka yaaboo
Rabbi baa wax arsaaqee
Adigoo anfac raadin
Hayga Iibin Awoowe!
* * * * * * * * * * *

Ileys waa mid aqoone
Ardadoon la sinnaado
Ama aan u horreeyoo
Aan abaalmarin qaatoo
Amiirkii berritooliyo
Ubax laygu misaalo
Waan jaclaa dugsi aadkoo
Alif aan ka billaabo
Illaa aan Injinneeriyo
Dhaqtar loo wada aayo
Ustaad faafin tacliintiyo
Noqdo Aw dhiga diintoo
Bulshadiisa iftiinsha

Waase ley eryayaayoo
Oggolaansho ma haystoo
Waxyow soo urayaahi
Ka dhaqaaq agaheenniyo
Aflagaaddiyo caydaa
Ehbin laygu daraayoo
Ma niyeysto albaabka
Hadduuse Eebbe yiraahdo
Aamiintaan ku duceyno
Intuu weyne ajiiboo
Afmiishaarta la buubsho
Indheergarad la tilmaamiyo
Akhiyaartoo hageysa
Mar un bey umaddeydu
Xuquuqdeyda ogaanne
Amaah looma baxshaan iyo
Arligu waa dhaxalkeygee
Aakhiraan la hureyne
Ilaahaaga ka yaaboo
Rabbi baa wax arsaaqee
Adigoo anfac raadin
Hayga Iibin awoowe!
* * * * * * * * * * * *

Oogadeyda rafaadka
Indhahayga qarsoomay
Addimadaan qalqaloocdiyo
Ilkahaan kala jeestay
Horay looma arkaan iyo
Wax kalaan u ekaadoo
Marka aan ag maraayo
Dadku wey orriyaanoo
Waa ogaal li' idoode
Waa addoon xiska beeley
Yay intaa ku hayaanoo
Alaab saan ahay tood ah
Ababin qaar an lahayn iyo
Ilmahaa igu dheeloo
Uusey naaxay jugtiisiyo
Urug haddaan ka badbaado
Waa Alxamdu-Lillaahi

Hadduuse Eebbe yiraahdo
Mar bey Eeddiyo Aayo
Abtigii an tabaayiyo
Adeeroo is xilqaamay
Asxaab khayrka u heellan
Is uruursanayaanoo
Sida Islaamka dhashooda
Aayaamaha carrafaad iyo
Iidda aan farxayaaye
Amaah looma baxshaan iyo
Arligu waa dhaxalkeygee
Aakhiraan la hureyne
Ilaahaaga ka yaaboo
Rabbi baa wax arsaaqee
Adigoo anfac raadin
Hayga Iibin awoowe!
* * * * * * * * * *

Afrika meeshan ku aallo
Inaan Soomaali ahaado
Waan ku faani abkeyga
Isirkeygii horeeto
Asaaggiis uma liidan
Ajnabi soo duldagaayoo
Oogadooda raraayiyo
Isticmaarki ma yeelin
Askarteenni difaaciyo
Waatii ciidan ammaanan
Shicibkeennu istaagoo
Akhiyaartu shahiidday
Maantana waa imtixaane



Waxaan ciilka la ooyay
Uurku uu I bukooday
Argagaxoon filan waayay
Markii qaar ibtilooboo
Iimaankii laga siiboo
Akhlaaq maafiyo yeeshay
Qaar dhulkii bar ijaare
Qaarna uu sun ku aasay
Qaarna ay ololsheenba
Qaarna uu alalaasoo
Addoonsi baanu rabnaayoo
Aqbal weeye dheheeniyo
Indhosarcaadkiyo beenta
Ahbal sheekadu moogyay
Anfariir waxa taagan
Amakaaggiyo yaabka
Ayaxaa la wacaayo
Wuxu eel ka tagaayo
Aayatiinka dambeetiyo
Berri aafo dhigaaya
Hadduuse Eebbe yiraahdo
Alle Aamin ma iishoo
Axad Weyne rumeeyay
Awood looguma faano
Ilaah baa I abuurtay
Addoonkiis iga yeeloo
Addeec waa igu waajib
Waa Islaam mabda'eygu
Sidii Imaamki Gureey iyo
Geesiyaashi adduunkee
Ableey guusha ku keenay
Anoo Allaah ku takbiirsan
Ururradii Danabeed iyo
Guutooyin baan unkayaayoo
Axmaqii I haweysta
Inta aan ul u qaato
Anigaa eryan doonoo
Uuleey waa is naqaanne
Intaan Abeeso na ruugin
Aan abaabul billaabee
Amaah looma baxshaan iyo
Arligu waa dhaxalkeygee
Aakhiraan la hureyne
Ilaahaaga ka yaaboo
Rabbi baa wax arsaaqee
Adigoo anfac raadin
Hayga Iibin awoowe!

Arligu waa dhaxalkeygee
Hayga iibin Awoowe!

Rabbi baa wax arsaaqee
Hayga iibin awoowe!

Adigoo anfac raadin
Haygya iibin awoowe!

Ilaahaaga ka yaaboo
Hayga iibin Awoowe!

Aakhiraan la hureyne
Hayga iibin awoowe!

Hayga iibin Awoowe!
Hayga iibin Awoowe!
Hayga Iibin Awoowe!

Axe ! meeyay damiirkii?
Aahe, waa ku sidee?
Aqligii ma dhammaaday?
Aawayeey Naxariistii?

Hayga iibin Awoowe!
Hayga iibin Awoowe!
Hayga Iibin Awoowe! ”

Awoowe Dagane,

Hilmaan hadal kuma jiree, waxaa halkaan kaa salaamaya asxaabteyda gaarka ah oo aan sawirradooda warqadda kuugu soo lifaaqay ayna ka midka yihiin: Tacbaan, Suuxaaye, Qaawane, Maqadeeye, Miskiin, Luudaaye, Kaneeco, Maahsane, Dhibban, Yaabban, Rajo, Murugo iyo Nafyar. Waxayna leeyihiin:

“ Nagu salaan awoowgaa Dagane, salaanna ha naga gaarsiiyo saaxiibbadiis oo ha u sheego AWOOWEYAASHEEN in ay Allahooda ka baqaan, aakhiro xisaab ayaa jirtee”. Waxaa kale oo ay leeyihiin: “ Dugsasho shisheeye dabeyl kaama celisee, AWOOWEYAASHEEN ha aaminaan dalkooda iyo dadkooda. Annaga ayaa markaan weynaanno daryeelkooda diyaar u ah, darxumana ma arki doonaan Insha-Allaahu iyagu maanta haba na dayaceene!”. Waxaan leennahay dal barwaaqo ah oo Daa’in nagu manneystay, waxaanan wada rumeysannahay Diinta Islaamka oo ah mid aakhiradeenna iyo adduunkeennaba liibaan noo horseedeysa.

Ammaana Allah Awoowe,

Wiilkaadii aad dayacday

Dulmane Daacad

Farriinta Qoraaga

Akhristaha qaddarinta mudanow,

Ujeeddooyinka ugu muhiimsan ee qoraalkan laga lahaa waxaa ka mid ah, in il raxmad leh lagu fiiriyo agoomaha dayacan oo aan cidina u maqneyn ceelna u qodneyn. Sidaa darteed waxaa si xushmad iyo naxariis leh lagaaga codsanayaa haddii aad karto inaad u istaagto gargaarka agoonta, adigoo ka billaabaya kuwa ehelka ama deriska kuu ah. Haddii aadan waxba u awoodin, fadlan ha ku dhibin dhaxalkooda ee u dhaaf!. U dhaaf fadlan u dhaaf!!! Xusuusnow aqriste in dhaca maal agoomeed abaalmarintiisu ay tahay dhamac naareed oo dhabanka la saaro, Rabbi (SWT) ayaan ka magangalnaye.

Aan u wada gurmanno inta gargaarkeenna u baahan, gaar ahaan AGOOMAHA oo in badan oo ka mid ahi ay maanta dayac iyo dandarro la deris yihiin.

Mahadsanidiin

Inj. Maxamed Cali Cibaar
Delft, Holland
Mohamed_ebar@hotmail.com

Tifaftirka: www.Samaddoon.com

Isha sawirrada : Somalitalk.com + Google.com

Qoraalladii hore ee qoraaga:

Warqad Furan II : Inta Talo La Hayo, Tabar Ha La Yeesho

Warqad Furan I : Badbaadiya Bulshada Aad Badbaaddaane

Ka Diida Bush Dadkeygiyow !

Wallee La Gadood Ama La Gumow

Kala Doorashada Kud Iyo Qanje

Afqalaad Aqoontu Miyaa?

Suugaantii hore ee qoraaga:

Dabin, Ka diida Buush, Murugo, Damaq, Waajib, Dhalanteed, Dhakafaar, Gaashaandhig, Dawo, Dadaal, Dulqaad,